# WISe: Macluumaad loogu talogalay Qoysaska

## Waa maxay WISe?

WISe waa adeeg ikhtiyaari ah oo adeegsada hab kooxeed si uu u haqabtiro baahiyada carruurtaada. Wuxuu bixiyaa adeegyada caafimaadka dhimirka oo ballaaran si uu u taageero carruurtaada uguna caawiya qoyskaaga in uu hadafkiisa gaaro.

### WISe wuxuu diiradda saarayaa:

- Bixinta adeegyada caafimaadka dhimirka oo ballaaran oo loogu talagalay in uu ka caawiyo carruurtaada iyo qoyskaagaba in ay gaaraan wanaag, ammaan, iyo xoojinta xiriirrada bulshadaada dhexdeeda.
- In la diyaariyo qorshe daryeel shakhsiyeed, oo ku saleysan awoodaha iyo baahiyada tixgeliya dhaqanka, qiyamka, caadooyinka, iyo dookhyada qoyskaaga. Hagidda ilmahaaga iyo qoyskaaga iyo dardargelinta qorshe iyada oo la adeegsanayo kooxda. Xubnaha kooxda waxaa ka mid ah taageerooyin dabiici ah (sida qoyska, saaxiibbada, iyo hoggaamiyayaal diimeedka) iyo xirfadlayayaasha la shaqeeya qoyskaaga (sida la-taliyayaal, iskuulo, CPS, iyo qofka u xilsaaran dambiilaha in uu sheedda kala socdo).
- In lagu bixiyo adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka iyo taageerooyin goobaha iyo wakhtiyada sida wanaagsan ugu habboon carruurtaada iyo qoyskaaga (oo ay ku jiraan gurgaaga iyo goobta dadweyne ee aad doorato, iyo fiidadka ama maalmaha fasaxa ee todobaadka).
- In la aqoonsado, oo la iskuduwo kheyraadyada kale iyo taageerooyinka carruurtaada iyo qoyskaaga sida daaweynta isticmaalka maandooriyaha ama falanqeynta hab-dhaqanka ee sida dhabta ah loo fuliyo.
- In caawimaad la bixiyo inta lagu guda jiro waqtiga ay dhibaatada jirto. Waxaad helaysaa adeegyada dhibaatada ama shiddada ee loogu talogalay ilmahaaga wakhti kasta maalintii, 365 maalmood sannadkii. Cunugaaga wuxuu adeegyo ka heli doonnaa shakhsiyaad garanaya duruufaha iyo baahiyada qoyskaaga iyo carruurtaada, iyo sidoo kale qorshahooda dhibaatada ee hadda., Kani waxaa ka mid ah waxqabadyo fool-ka-fool ah oo lagu bixiyo goobta ay dhibaatadaadu ka dhacdey,, marka ay habboon taahy, iyo aqoonsashada kheyraadyada kale si wax looga qabto xaaladaha dhibaatada marka loo baahdo.

## Kumaa heli kara WISe?

WISe waxaa heli kara dhallinyarada xaqa u leh Apple Health sida ku cad WAC 182-505-0210, ee da'doodu tahay 20 iyo ka yar kuwaas oo ka soo baxa shuruudaha lagama maarmaanka u ah caafimaadka ee adeeggan loogu talagalay.

## Goormee ayay waxtar ii leedahay in aan helo WISe?

Waxaad carruurtaada u diri kartaa baaritaanka WISe waqti kasta. Waalidiintu waxay bilaabi karaan daaweynta, laakiinse ka-dib da'da 13 sano, ilmuhu waa in uu oggolaado adeegyada. Waa in aad tixgelisaa in ilmahaaga u dirto baaritaanka WISe haddii isaga/iyada:

- Ay yihiin adeegsade si joogto ah u adeegsada khadka shiddada ama dhibaatada ama qololka xaaladaha degdegga ah, iyadoo sabab u ah walaacyo ku saabsan caafimaadka dhimirka ilmahaaga.
- Ay la kulmayaan hab-dhaqanno adag in la fahmo (sida cararidda ama xiritaan joogto ah oo sabab u ah caafimaadka dhimirka) kuwaas oo ku adag adiga, daryeelayaasha kale, ama daaweeyeyaal/caafimaad bare, iyadoo adeegyada sooyaalka ah keligooda ku caawin.
- Ay muujinayaan khatar korortey oo ah dhibaato ay u geysanayaan nafsadooda ama dadka kale ah.
- Ay u baahan yihiin hab daaweyn ballaaran ama gaar ah.
- Ay u baahan yihiin hab lag qaybgalayo oo aad u debecsan.
- Ku lug leh nidaamyo badan (sida, caafimaad dhimirka, nolol wanaag ilmaha ah (CPS), cadaaladda dhallinyarada, adeegyada naafonimada koritaaka, iyo/ama daaweynta isticmaalka maandooriyaha) iyadoo nidaamka (nidaamyada) ay la dhibtoonayaan in ay si wadajir ah u caawiyaan ilmahaaga.
- Ay dhigtaan Waxbarasho Gaar ah iyo/ama ay leeyihiin Qorshaha 504, oo leh iskuul joojin badan oo loogu talagalay caafimaadka dhimirka iyo/ama arrimo hab-dhaqan.

## Sideen ilmaheyga ugu gudbin karaa WISe?

U gudbinta baaritaanka WISe ayaa waqti kasta la sameyn karaa. Si aad u oggaato cidda lala xiriirayo booqo: https://www.hca.wa.gov/assets/program/rolling-update-wise-referral-list.pdf si aad u hesho liiska adeeg-bixiyeyaasha WISe ee qandaraaska lala galey ee degmada ahaan.

Haddii aad aaminsan tahay in ilmahaaga uu ka faa'iidayo adeegyada caafimaadka dhimir, isticmaal macluumaadka xiriirka ee laga helo mareegtadan kor ku xusan si aad u sameyso gudbin, ama ka wac Khadka Tooska ah ee Bogsashada, lambarkan bilaashka 866-789-1511.



Washington State Health Care Authority

## Maxaan Filan Karaa?

Dhammaan gudbinta waa in ay ka yimaadaan baaritaanka CANS (qalabka Awoodaha iyo Baahiyada Qaangaarka iyo Carruurta). Baaritaanka CANS waa in 14 maalmood gudahooda lagu bixiyaa ka-dib marka gudbinta la helo. Dhammaan baaritaannada CANS waxaa ka mid ah:

Macluumaad ururin, si loo sameeyo baaritaanka CANS. Baaritaankan wuxuu go'aamin doonnaa haddii ay u muuqato in ilmahaaga uu ka faa'iidayo heerka daryeelka uu WISe bixiyo. Qalabkan baaritaanka waxaa lagu sameyn karaa telefoonka ama qof ahaan ayaa loo sameyn karaa.

Marka qalabka baaritaanka uu muujiyo in WISe uu marka dambe ka faa'iidi karo ilmahaaga, ilmahaaga waxaa loo gudbiyaa hay'adda WISe si loogu sameeyo qiimeynta qaadashada. Haddii WISe la go'aamiyo in caafimaad ahaan ay lagama maarmaan u taahy ilmahaaga, hay'adda bixisa adeegyada WISe ayaa ka-dib u qoondeyn doonnaa koox cusub ilmahaaga ka-dib daryeelka oo dhan ayaa la isugu duwi doonnaa iyada oo loo marayo hay'adaas/kooxdaas.

Haddii la go'aamiyo in ilmahaaga uusan u muuqan in uu ka soo baxo heerka daryeelka ay WISe bixiyaan, ilmahaaga waxaa loo gudbin doonnaa adeegyada kale ee caafimaadka dhimirka, ee loo arko in ay ku habboon yihiin, si wax looga qabto baahiyadiisa/baahiyadeeda.

## Ma doonaysaa in aad ku lug yeelato?

Codkaaga wuxuu nagu caawin karaa in aynu sii wanaajino adeegyada loogu talogalay carruurta iyo dhallinyarada. Qoyska, Dhallinyarada, Miisaska Wareegsan ee Nidaamka Iskaashiga (FYSPRTs) waa qayb muhiim ah oo ka mid ah qaab-dhismeedka maamul ee shaqeeya si loo sii wanaajiyo nidaamka caafimaadka hab-dhaqanka carruurta, oo uu WISe ka mid yahay. Halkan wax badan ka ogow:
**https://www.hca.wa.gov/fysprt**